

# **Ergada, Aragtida Dheer, Yoolasha iyo Qiimayaasha SDOT**

## **Arrimaha uu Duq Nickel mudnaanta siiyay ee Seattle**

- In Seattle Hore Loo Wado
- In Xaafadaheena Ammaan Laga Dhigo
- In Dhammaan Dagganayaasha Shaqooyin iyo Fursado Loo abuuro.
- In Dhiso Qoysas iyo Bulshooyin Caafimaadqaba.

## **Ergada (Mission) ee SDOT**

In lala yimaaddo hab-gaadiid oo ammaan ah, oo la isku-halayn karo, oo waxqabad fiican leh oo kor loogu qaadayo dagaanka iyo dhaqaalaha Seattle

## **Aragtida dheer ee SDOT**

In Seattle laga dhigo magaalo fir-fircoon oo ku saraysa dhinaca gaadiidka.

## **Yoolasha SDOT**

Si aynu ugu gacan sarayno dhinaca gaadiidka waxaanu:

- Ilaalin doonaa oo illaa heerka ugu sareeya ee awooddoodeena u isticmaalaynaa kaabayaasha gaadiidka ee waqtigan xaadirka ah jira.
- Dadka iyo qalabyada u hawl-gelin doonaa si fir-fircoon oo ammaan ah anaga oo isticmaalayna teeknooloojiyadda, meel-kasta oo ay taasi suurtagel ka tahay, si aynu ugaga gudubno taxaddiyada dhinaca gaadiidka.
- Hoos ugu dhimi doonaa ku-tiirsanaanta baabuurta oo aynu baabuur sugidda, baaskiil waddida iyo lugaynta ka dhigi doonaa habab habboon oo soo-jiidashana leh.
- Samayn doonaa si aynu mustaqbalka gaadiidka ugu wanaajinno hab muujinaya kaalinta iyo isku-xidhnaanta ay Seattle gobolka ku leedahay.
- Go'aan-welba, mashruuc-welba iyo barnaamij-welba ku soo daraynaa horumar aad u sareeya oo laga gaadho dhinaca dagaanka.
- Kor ugu qaadi doonaa nolol ku-habboonida xaafadaheena iyo bulshooyinkeena.
- Dagganayaasha Seattle, ganacsiyada, xaafadaha, soo-booqdayaasha iyo shariiyada gobolka u fidin doonaa adeeg macaaniil oo aad u sareeya.
- Si aqliyaysan u maarayn doonaa khayraadka; waxqabadkana waanu cabbiri doonaa.
- Waxaanu shaqaalaynaynaa, tababbari doonaa oo aynu shaqooyinkooda ku sii hayn doonaa cuddud shaqaale oo kala-duwan oo dhaqmo kala-duwan ka kala- socda, cuddudaas shaqaale waanu sharfi doonaa.

## **Qiimayaasha SDOT**

Marka aynu dhaqan-gelinayno qiimayaashan SDOT waxaanu noqon doonaa kuwo xanaanayn, xurmayn iyo aamminimo leh. Waxaanu ku soo caan bixi doonaa isku-duubnaatayda, kartida aynu u leenahay la shaqaynta dadka si aynu dhibaatooyinka u xallino iyo hal abuurkayaga. Qof-welba oo shirkaddan ka tirsan wuxuu kari doonaa in uu ku horumaro kartidiisa ugu saraysa ee uu gaadhi karo. SDOT waxay noqon doontaa meel la jeclaado iyo meel lagu shaqeeyo.

Waxaanu ku faanaynaa in aynu bixinno adeeg dadweyne oo ay tayadiisu sarayso.

Waxaanu xirfadlayaal ku nahay nooca hawsha aynu qabano, waxaanu u dhaqmaynaa hakaas.

Waxaanu mas'uul ka noqonaynaa guushayada, si ay kuwa kale u guulaystaana si firfircoon aynu ugu dadaalaynaa.

Waxaanu leenahay isku-dheelitirnaan caafimaad-qabta oo ka-dhaxaysa shaqadayada iyo nolosheena shakshiyeed.

Waxaa qiimo la siinayaa loona bogayaa kaalinta uu shakhsi- welba oo shirkadda ka- tirsan uu ku soo darayo dadaalka aynu koox ahaan qabanayno anaga oo ah SDOT.

Waxaanu xurmaynaynaa oo aynu u boggayna kala-duwanaanta noo dhaxaysa ee xagga qolada, dalka aynu ka soo-jeedno, qowmiyadda, luuqadda, jinsiga, habka nololeed ama hannaanka galmo.

Waxaanu isula-xidhiidhaynaa si toos ah, is-xurmayn iyo daacadnimo leh.

Waxaanu mas'uul kanahay in aynu abuurno goob-shaqo oo ammaan ah oo caafimaad qabta.

Si aynu u wanaajino tayada nolosha Seattle, waxaanu nahay kuwo la imanaya wax cusub iyo hal-abuur tayada nolosha Seattle lagu wanaajinayo.